

Qasriga afka



Ku soo dhowow qasriga afka!

Afku waa qasri ka kooban qolal badan. Waxaad halkaan ka heleysaa **fureyaal** kaa caawiya furitaanka albaabada. Ereyadaada waxay dunida u furaan ilmahaaga.

▢ Goormaan bilaabayaa inaan wax u aqriyo?

Biloow hadda! Carruurta ayaa afkooda hormariya muddo wax badan ka horeysa inta aysan hadalka bilaabin. Hadla, heesa och marar badan wax wada aqriya.




▢ Afkee baan wax ugu aqriyaa?

Wax ku aqri, ku hadal oo ku hees afka aad sida wanaagsan u taqaan. Carruurtu waxay mar qura wada baran karaan afaf badan.

▢ Maxaan u aqriyaa?

Waxaad doonto u aqri! Muhimaddu waa inaad wax aqrisaan. Maktabadda tag, halkaas ayaa lagaa caawin karaa! Buugaag ku qoran afafka kala duwan oo lacag la'aan ayaad maktabadda ka soo amaahan kartaa. Ilmuu ma jecel yahay baabuurta? Soo amaaho buug ka sheekeynaya buugaagta!



Sidee baan wax ugu aqriyaa?

- **Qaabka adiga kuu goonida ah wax ugu aqri!** Ilmaha ayaa jecel inuu maqlo codkaada.
- **Qaab hadal wax ugu aqri!** Uma baahnid inaad aqriso ereyada oo dhan. Hadal oo tilmaam sawirada buugga. Buuggu ma ku saabsan yahay butida carruurta? Tilmaan markaa butida saxda ah ee ilmuu leeyahay.
- **U oggolow inuu ilmuu hogaanka hayo!** Ma doonaya ilmuu inuu hal bog dhowr jeer aqriyo? Markaa sidaa u yeel. Uma baahnid inaad buugga oo dhan aqriso. Muddo gaaban ayaa ku filan.
- **La baashaal ilmaha!** Dami mobiilka iyo telefishanka. La fariiso, si uu ilmuu xiriir indhaha kuula yeesho buuggana aad isla eegtaan.
- **Meel kasta wax ugu aqri!** Miiska cuntada wax ugu aqri, sidoo kale musquusha iyo sariirta wax ugu aqri. Buugaagta meel dhow soo dhigo, si uu ilmuu isagu u soo qaato.
- **Si wad inaad kor wax ugu aqriso,** xataa markuu ilmuu soo roonaado! Barashada ereyo badan ayaa uga faa'iideyneyo iskuulka iyo nolosha kaleba.



Afkaada hooyo waa waxa ugu wanaagsan ee aad siin karto ilmaha.



Qasrigeena weyn ee afka waxa ku
nool kaneeca yar oo wax aqrisa.
Dhegahaada ka guuxeysa, jecelna
inay wax sameeyo.

Taasoo ka boodeysa fartaada, una
boodeysa madaxaada buuran.
Ku soo degeysa sinkaada, horeyna
ka bilaabeysa wax aqrinta.

Ku ciyaar caloosha, oo raaxeyso maalinta oo dhan.
Faraha cagta kaa dhunkatay, xisaabisay shan, kadibna
u duushay kaneecadu gurigeeda.

Qora: Susanne Granberg iyo Sofia Sundström

Qasriga afku waa maalgelin lagu
kobcinayo afka dhalaanka goobaha
kala duwan ee ku yaal degmooyinka
iyo gobolka Sörmland.



Biblioteksutveckling
Sörmland